



## Dhammaan Ardayda PPS Addeeg Caafimaad Ayey Ka Helayaan Xarumaha Caafimaadka Ardayda

Arday kasta oo ka tirsan ardayda Dugsiyada Dadweynaha Portland oo u baahan addeeg caafimaad iminka wuxuu ka heli karaa addeegaasi shan goobood oo ka mid ah dhismayaasha PPS addeeg bilaa lacag ah. Ka dib markii la xidhay intii badneyd ee sanad-dugsiyeedkii la soo dhaafay ee 2020-21 iyada oo sababtuna ahayd xanuunka faafayey ee COVID-19, waxaa dib loo furay Xarumihii Caafimaadka Ardayda Dugsiyada Dadweynaha Portland ee ku yaalay dugsiyada sarre ee PPS.

Dhawaan waxaa dib loo furi doonaa Xarunta Caafimaadka Ardayda ee Dugsiga Sarre ee Jefferson, goobtaasi caafimaad oo noqon doonta xaruntii shanaad ee Xarunta Caafimaadka Degmada Multnomah ee ku taala PPS sidii ay ugu addeegi lahaayeen ardayda da'doodu u dhaxayso 5 jir ilaa 18 sanno. Sidoo kale, Xarunta Fayo-qabka Benson (Benson Wellness Center) oo ay wada maamulaan Jaamacada Sayniska Caafimaadka Oregon (OHSU) iyaduna waxay ka furan tahay dhismaha Marshall.

Jefferson wuxuu ku soo biiray inuu ka mid noqdo goobaha Xarumaha Caafimaadka Ardayda Degmada Multnomah ee hore u jirey sida, Cleveland, Franklin, McDaniel iyo Roosevelt. Arday kasta oo ka mid ah PPS ama degan Degmada Multnomah da'diisuna u dhaxayso 5 sanno ilaa 18 sanno waa ay isticmaali karaan addeegyada ay bixiyaan oo ay ka mid yihiin baaritaanka caadiga ah, baaritaanka jir ahaan inaad ciyaaraha ciyaari karto, caafimaadka jinsiga, caafimaadka maskaxda, aragga iyo baaritaanka caafimaadka ilkaha, iyo tallaalka iyo baaritaanka xanuunka COVID-19.

Ardayda PPS waxay sidoo kale isticmaali karaan Xarumaha Caafimaadka Ardayda Degmada Multnomah ee ka baxsan degmada, sida Centennial, David Douglas, Parkrose iyo dugsiyada sarre ee Reynolds. Saacadaha ay furan yihiin xarumahani iyo macluumaadka kale ee dhammaan rugaha caafimaadka ardayda Degmada Multnomah, waxaad ka fiirisaa [shabakada barnaamijka](#).

Ardayda PPS waxaa sidoo kale lagu soo dhaweynayaa Xarunta Fayo-qabka Benson (Benson Wellness Center) taasi oo u guurtay dhismaha dugsiga Marshall, halkaasi oo dugsiga Benson loo wareejiyey saddex sanno ka hor intii lagu gudo jiray dib u cusbooneysiinta dhismihiiisii ku yaalay Waqooyi-bari Portland. Wixii macluumaad dheeraad ah ee dhinaca jadwalka, ballamaha iyo addeegyada ay bixiyaan, fadlan waxaad ka fiirisaa [bogga shabakada rugta caafimaadka](#).